

HADDII SHAQADA LAGAA CEYRIYAY - WAAN KU GARAB ISTAAGEYNAA!

Sanduuqa badbaadada TSL waa ceymis lacag la'aan ah oo loogu tala galay qofka shaqada laga eryo iyadoo ay sababtu tahay

shaqada oo yaraatay awgeed. Waa manaafacaad ka jira goobaha shaqada ee leh heshiiska wada jirka ah. Ceymisku

wuxuu ka dhiganyahay caawimaad ku aaddan in la helo shaqo cusub, shirkad la sameysto ama la billaabo waxbarasho cusub iyo caawimaad

ku aaddan la xiriiridda Försäkringskassan iyo hey'adaha kale ee dowladda. Wuxuu sidoo kale ka koobnaan karaa kaalmo

dhaqaale (Lacagta kaalmada ee shaqo ka tegista) iyo waxbarasho gaaban oo xirfadeed.

Taageerada aan ku siineyno waxaad ku dareemi kartaa ammaan:

- Isku celcelis ahaan waxaan sannadkii shaqo ka caawinnaa 15 000 oo qof
- 10ki sano ee ugu dambaysay waxaan caawinnay in ka badan 250 000 oo qof
- In ka badan 90 % oo ka mid ah kuwa aan caawinno waxay shaqo cusub ku helaan hal sano gudeheeda

SIDAN AYEY WAX U DHACAYAAN

1. Waxaad la kulmeysaa la taliye xagga isbeddel la qabsiga ah oo ka socda TSL, waxaana macluumaad lagaa siinayaa fursadaha jira
2. TSL waxay kuu dooreysaa shirkad xagga isbeddel la qabsiga ah oo ku taba bari doonta
3. Waxaa kula soo xiriiraya tababaraha shaqada ee kaala shaqeyn doona sidii aad shaqo cusub ku heli lahayd
4. Haddii loo baahdo waxaad sidoo kale fursad u heleysaa in aad heshid waxbarasho gaaban oo xirfadeed
5. Haddii aad 40 sano ka weyntahay waxaad heli kartaa kaalmo dhaqaale oo shaqo ka tegis (AGB)

Sanduuqa badbaadada TSL

tel: 010-480 91 00

e-mail: info@tsl.se

XAQIIQ

XAQ MA U LEEDAHAY TAAGEERO ISBEDDEL LA QABSASHO?

Ceymiska isbeddel la qabsashadu waa manaafacaad loogu tala galay adigaaga ka shaqeeya goob shaqo oo leh heshiis wada jir ah

oo ka tirsan ururka LO. Maaha wax shardi ah in xubin laga ahaado urur shaqo.

Shuruudo:

- Shaqo joogto ah
- 12 bilood oo shaqo oo is heysato ah oo aad ka shaqeysay hal shirkad ama dhawr shirkadood oo heshiis wada jir ah leh
- Ugu yaraan 16 saacadood oo waqti shaqo ah usbuuciiba
- In shaqada lagaa ceyriyay iyadoo ay sababtu tahay shaqada oo yaraatay awgeed
- In aadan buuxin 65 sano

Macluumaad ku aaddan ceymiska isbeddel la qabsashada bogga <http://www.tsl.se/jobsokare/>

XAQ MA U LEEDAHAY LACAGTA KAALMADA AH EE SHAQO KA TEGIDDA?

Lacagta kaalmada ah ee shaqo ka tagiddu, AGB waa lacag hal mar ah oo lagu soo shubayo adigaaga laga eryay

shaqo joogto ah iyadoo ay sababtu ahay shaqada oo yaraatay awgeed. Sanadka 2019 waxay lacagtu u dhexeysaa

36 487 iyo 53 064 kr iyadoo ku xiran da'da. Waa ceymiska AFA cidda maamuleysa AGB.

Shuruudo:

- Waa in aad shaqeysay 50 bilood shantii sano ee ugu dambeysay
- Waa in aad ka shaqeyneysay shirkad ama shirkado badan oo leh ceymis isbeddel la qabsasho
- Waa in shaqada lagaa eryay iyadoo ay sababtu tahay shaqada oo yaraatay awgeed
- Waa in aad 40 sano buuxisay ugu dambeyn maalinta ugu dambeysa ee shaqada
- Adiga ayaa codsanaya kaalmada lacageed ee shaqo ka tagidda
- Waa in shaqa bixiyahaagu uu codsiga saxiixaa

Wax dheeraad oo ku aaddan shuruudaha iyo kaalmada lacageed ee shaqo ka tagidda ka akhriso bogga intarneetka ee ceymiska AFA:

<http://www.afaforsakring.se/avgangsbidrag>